start Sharci Lr: 13 ee 7/9/2000 -
Q:113 Qaanuunka Madbacada iyo Qoraalada.



| DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA | PUNTLAND STATE OF SOMALIA |
| --- | --- |
| *XAFIISKA MADAXWEYNAHA* | *OFFICE OF THE PRESIDENT* |

Sharci Lam 13 ee **7/09/2000** Garoowe **29 September**
kuna saabsan Qaanuunka Madbacadda iyo Qoraalada

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda Puntland.

**MARKUU TIXGELIYEY** Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda summaddeedu tahay GW/58/2000, taariikhdeeduna tahay Garoowe 04/09/2000.

**WUXUU SOO SAARAY: -**

Sharcigan soo socda:

**Qodobka 1aad**

Sharcigan Madbacadda iyo Qoraalada ee Dawladda Puntland ee sharciga ku lifaaqan waa la ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

Saddex nuqul oo sharcigan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada hal nuqul, Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul.

**Qodobka 3aad**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Dawladda, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna sharcigani ka mid noqonayaa sharciyada dalka, qofkastana waxaa ku waajib ah inuu dhawro kuna dhaqmo.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

**DAWLAD G.PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE**
**OF SOMALIA**

## Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka Boosaha & Isgaarsiinta
## Ministry of Information Culture & Telecommunications

Ref: - [illegible]

Qeynuunka Madbacdaha iyo Qoraalada

MADAXWEYNHA DOWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND

MARKUU ARKEY: Axdiga Dowlad Goboleedka Puntland

MARKUU ARKEY : Soojeedinta W/Warfaaafinta Dhaqanka Boosaha iyo Isgaarsiinta
MARKUU DHAGEYSTEY: Golaha Wasiirada Dowlad Goboleedka Puntland

MARKUU TIXGELIYEY: In loo baahanyahay Inla soosaaro Qeynuun kusaabsan Madbacadaha iyo Qoraalada

WUXUU SOO SAAREY

QEYNUUNKA SOO SOCDA

### Qod 1aad

Madbacad waxaa loola jeedaa Mashiinada(MECHINES) qalabka iyo waxyaalaha wax lagu daabaco .

### Qod 2aad.

Qeynuunkani wuxuu nidaaminayaa isticmaalka madbacadaha, soodejintoooda (IMPORTATION), waxsoo saarkooda, qoraalda daabacan iyo qeybintooda

### Qod 3aad

Qof madbacad heysan kara ama kushaqeysan karaa majiro hadii aanu ruqsad (license), kahaysan Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka, Boosaha & Isgaarsiinta,ruqsadaa waxaa labixinayaa dalabka narka lakeeno US$ 100

Qod 4aad.

Ruqsada waxaa waqtigeedu ku egyahay 12 bilood .

Qod 5aad.

Qof ama Hay'ad kasta oo qaj haduu u ogol yahay waa keensan karaanMadbacad maddii uu ka helo ruqsad Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Isgaarsiinta.

dbacdii daabacda ama soo saarta Dukuminti Dawladeed sida Baasaboorada. lesanka wadidaQod 6aad.

Madbacadii aan ruqsad loo heysan Dowladdu waa joojin kartaa waana la xiri karaa ilaa qofkii tihi ruqsad helo.

Qod 7aad

Madbacdii ruqsad leh oo lagu daabaco qoraalo qarsoodi ah ee qeynuunka kasoo la fiiceda. waxaa laga qaadayaa talaabas sharci oo ku haboon .

Qod 8aad.

Qofkii gurigiisa dhiga ama ka kireeya madbacad aan ruqsad laheyn waxaa laga qaadayaa talaabo waafaqsan shareiga

Qod 9aad.

Madbacadii daabacda ama soo saarta Decumenti dawladeed sida Baasaboorada. Leysanka wadida. Teesarayaasha.Shahaadooyinka IWM ogolaansho dawladeed la'aan qofka leh Maxkamad ayaa la horgeynayaa.

Qod 10aad

Madbacada ruqsada leh. Waraaqaha Aqoonsiga, Biilalka.Canaawiinta Magacyada Shirkadaha. Hayadaha(letter heading). ogeysiisyada. fidhebda gunaeysiga Waraaqaha Xafladaha arooskyada.IWM waa daabici kartaa noockasta ay yihiin.

Qod 11aad.

Qofkasta oo daabaca ,soo saara ama ogolaada in ladaabaco ayadoo la isticmaalyo mashiinkiisa (Printing Mechine) qoraal ama documenti Diinta Islamka.aadaabta caamka ah ama anshaxa khilaafsan. ama lid ku ah Amniga ama ay ku jirto kicin dagaal. rabshado ama gacan ka-hadal iyo waxyaabo ka ku ah shakhsiyo Haani. Falaaganimo. u hogaansanaan la'aan qeynuunka.awaamirta Dowladda iyo wax kasta oo nabada jebinkara ama abuuri kara shucuur niyad xumi. Cadaawad.Karaahiyo.Tafaraaruq.iyo Midnimo la'aan.waxaa laga qaadayaa talaabo waafaqsan shareiga ciqaabta Soomaaliyeed.

Qod 12aad.

Madbacadii lagu daabaco wargeys aan ruqsad ka heysan wasaarada warfaafinta soona gelisa dalka ama qaybisa wargeysyo,qoraal mamnuuc ah, waxaa lagu ganaaxayaa lacag aan kayareen 2,000,000.Sh so.

**Qod 13aad.**

Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Isgaarsiintu, waxay ruqsad siinaysaa cid kasta oo ka dalabta in ay dalka soo geliso Buugaag, Wargeysyo iyo Qoraalo aan ka hor imaanayn Diinta Islaamka iyo shuruucda dalka.

**Qod 14aad.**

Wasaarada Warfaafintu waxay awood uleeyahay in cidii qeynuunka daabacaada ku xad gudubta ruqsada kaqaado.

**Qod 15aad.**

Daabacaad kasta ee uu ku jiro kari kateer, Sawir,Riboor, Maqal iyo Muuqaal,Muusiko ama wax kale oo kasoo horjeeda amniga guud, anshaxa, nabadgelyada, xiriirka kadhexeeya Puntland iyo gobolada kale ee Soomaaliya, Dowladaha deriska ah ama dalalkja kale, cidii dalka soo gelisa waxaa laga qaadayaa talaabo waa faqsan sharciga.

**Qod 16aad.**

Qoraal kasta oo ladaabaco ama lafaafiyo waa in lagu qoro far la'akhriyi karo af-Soomaali,Carabi ama Ingiriis madbacada lagu daabacey magaceeda iyo cinwaankeeda.

**Qod 17aad.**

Qof daabici kara, dib u daabici kara, gadi kara,qeybinkara ama wareejinkara qoraal aanu ku qornayn magaca iyo cinwaanka faafiyaha (publisher) majiro, haddii ladaabacana qofkii falkaas sameeya waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo dhan 3,000,000 Sh.So.

**Qod 18aad.**

Hadii ay cadaato mad bacada in ay leeyihiin Urur,Xisbi,Jamciyad qarsoodiya ama aan ogolaansha qeynuuni ah haysan,madbacada noocaas ah Dowladu waa la wareegi kartaa,cidda mas'uulka ka ahna waxaa lahor geynayaa maxkamada ku shaqo leh.

**Qod 19aad.**

Qeynuunkani wuxuu kale oo khuseeyaa Computerka Ganacsiga ah, Maqalka iyo Muuqalka, Farshaxanka iwm waxaa laga rabaa iney kaqaataan ruqsad Wasaarada Warfaafinta.

End



Qod 20aad.

Wasaaraddu waxay ku leedahay meheradaha noocaas ah khidmad ruqsadeed oo dhan :

| | | |
|---|---|---|
| 1- kombiyuutarka | Sh.So | 500,000 Sanadkii |
| 2- Footada | " " | 500,000 " |
| 3- Maqalka&Muuqaalka | " " | 500,000 " |
| 4-Farshaxanka | " " | 50,000 " |

Qod 21aad.

Wasaaradda Warfaafintu waxay mamnuuci kartaa iney dalka soo galaan buugag, wargeysyo, muuqaal, qoraal, warcad(statements),kari kateer Sawir,Riboor iyo wax kasta oo ka soo hor jeeda Diinta, Dhaqanka,Anshaxa iyo Sumcada Puntland.

Qod 22aad.

Haddii qofka Madbacada lihi Furuuc ku leeyahay ama Laamo kale meelo aan ahayn Xarunta Madbacada khidmada ruqsada farac kasta waa laga qaadayaa

Qod 23aad

Madbacadi masoo saari karto Wargeys, Qoraal, Buug, lajoojiyey ama lalaaley soobixidiisa, ilaa ruqsad kale lasiiyo.

Qod 24aad.

Burin.

Waxaa la buriyey qaynuun iyo xeer kasta oo aan la socon qaynuunkan ama ka soo horjeeda.

Qod 25aad.

Dhaqan Gelid.

Qaynuunkani wuxuu dhaqan gelyaa marka ay Gollaha Wakiiladu ansaxiyaan, Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Puntlandina saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee dowladda Goboleedka Puntland.

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Puntland

Cabdullaahi Yuusuf Axmed.

6.

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

*Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha * Ministry of Commerce & Industry*

Ref:________

Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Puntland.

Markuu arkey soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

Markuu arkay Warbixinta Warshadaha.

Markuu Tixgaliyey baahidda dadweynuhu u qabo adeega Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.

**Madaxweynah Dawlad Gobaleedka Puntland Wuxuu soo saaaray : -**

Sharcigaas oo ku saabsan khidmadaha laga qaado shatiyada Export & Import iyo Ganacsiga guud (Trading Licenses) kuwaas oo u qaybsama heerarka kala duwan sida hoos ku cad iyo qaybta la xiriita Foomamka iyo diiwaan galinta.

**<u>Qodobka 1aad Khidmadaha</u>**

**<u>Qaybta</u> 1:1 Khidmadaha laga qaado Export & Import Sandkii**

(a) Heerka Ganacsiga ee dhaqdhaqaaqiisu dhan yahay 250,000 USD iyo wixii kabadan waxaa laga qaadayaa Sh.So 3,000,000 (sadex malyan).

(b) Heerka Ganacsiga ee dhaqdhaqaaqiisu dhanyahay 120,000-250,000 USD waxaa laga qaadaya Sh. So 2,000,000 (labo malyan).

(c) Heerka Ganacsiga ee dhaqdhaqaaqiisu dhanyahay 100,000-120.000 USD waxaalaga qaadayaa 1,000,000 (hal malyan ).